Schweizerische Eidgenossenschaft
Confédération suisse
Confederazione Svizzera
Confederaziun svizra

Eidgenössisches Justiz- und Polizeidepartement EJPD
Département fédéral de justice et police DFJP
Dipartimento federale di giustizia e polizia DFGP
Staatssekretariat für Migration SEM
Secrétariat d'Etat aux migrations SEM
Segreteria di Stato della migrazione SEM

War kooban oo ku saabsan

B

Qaxootiga la aqoonsaday — aqoonsiga B

F

Qaxootiga ku jooga waraaqo ku meel gaadha ah — warqadda F

F

Dadka ku jooga waraaqo ku meel gaadh ah — warqadda F

Ku Soo Dhawaada Suwisarlaand

Waxaa laguu aqoonsaday qaxooti buuxa ; qaaxooti ku meel gaadh ah ama qof ku jooga dalka si ku meel gaadh ah. Shruuc gaar ah ayaa dhiga qof walba heerka uu ku sugan yahay joogi-taan kiiso. Boroshuurkani wuxuu soo koobayaa qodobo muhim ah oo ku haboon inaad tixgeliso.
Muddo dheer ayaad ku noolaan doontaa dalkan Suwisarland. Sidaa daraadeed waxaan filaynaa inaad dhexgal iyo dhaqan wadaag la yeelato dadka, si aad u barato qaab nololeedka dadka reer Suwiserland. Sidaa daraadeed, waa muhim inaad macluumaadka ursato, ku dedaasho inaad shaqo hesho, waxna barato. Boroshuurkan waxaad ka helaysaa macluumaad guud ahaaneed, iyo tilmaamo waxtar leh oo ku tusa xafiisyada iyo adeegyada ku siin doona warar dheeraad ah. Waxaan kuu rajaynaynaa inaad kaalintaada ka gasho Suwiserland.

Xafiiska Dawladda ee Socdaalka SEM

Broshuur kani waxa kale oo lagu helayaa qaabka eloktrooniga ee www.sem.admin.ch isagoo ku qoran afafka : Jarmalka, Fransiiska, Talyaniga, Ingriiska, Carabiga, Tigreega, Kurdiga, Tibeetka, Faarisiga, Taamilka, Soomaaliga, Bosniyaanka, Korowshianka, iyo Serbianka

www.sem.admin.ch

Qaxootiga aqoonsiga — aqoonsiga B

B

Waa daka qaxootiga ah ee dalkoodii, ama dalkay markii ugu dambaysay ay ku noolaayeen, lagu takooray ama ka cabsi qaba takoor la xidhiidhiida jinsiyadooda, waddaniyadooda, qoladooda ama reerkiooda, ama fikirkooda siyaasadeed. Xeerkani wuxuu ku sabsanyahay yahay Heshiiskii Jeneeva ee ku saabsanaa xaaladda qaxootiga. Waana takoor dhab ah oo khatar gelin kara qofka noloshiisa, jidhkiisa ama xorriyaddiisa ; iyo wax kastoo cadaadis aan la qaadan karin saarayaa dhinaca maskaxda ama dhimirka. Waxaa iyana la tixgelin kara mudan dumarka baxsadka ah sababaha ka dambeeya qaxotini madooda.
Heshiiska Janeefa ee xaaladda qaxootiga, waxaa kale uu qeexayaa inaan cidna lagu celin karin Dawalada, ama wadanka ay khatar ku sugnaan karaa haday ku noqdaan.

Saldhigga Shuruucda

Sharciga qaxootiga la aqbalay wuxuu ku salaysan yahay Qodobka 58 ilaa 62 ee xeerka qaxootiga (LA-si).
Nuqulka dhabta ah waxaad ka fiirsan kartaa internetka : www.admin.ch/ch/f/rs/c142_31.html

Buugyaraha Ajnabiga

Qaxootigaa aqoonsiga lihi waxay qaataan Buughyaraha Ajnabiga ee nooca B. Waxaana waddanka lagu joogi karaa hal sano oo dibna loo cusboonanaysiin karo. Cusboonaysiinta waa la diid kara mararka qaarkood haddi la helo sababo macquul ah sida qofka oo khatar gudaha ama dibedda kaga iman karta gelin kara dalka Suwiserland. Heyadaha adwooda u lihi waxay bixin karan joogitaan aan wakhti xaddidan lahayn (buugyare C), lana siiyo qaxootiga joogay dalka Swisarland muddo dhan toban sano. Qofkii si fiican ula qabsada dalka wuxuu tan oo kale ku codsan karaa muddo shan sano ah kadib.

Qaxootia ku meel gaadhka ah — warqadda F

F

Waa qaxooti ku meel gaadh ah ama qof buuxiiyay wixii looga baahnaa qaxootinimada, markuu isaga yimid dalkiisa ama kuwii kale ee u soo maray. Waxaa kale uu noqon karaa qof, inkastoo u buuxshay waxyaabihii looga baahnaa, haddana ku kacay wax xun oon la aqbali karin, sida dambi uu galay ama wax halis gelin kara nabadgelyada dalka, gudo iyo dibedba. Markaas oo kale Dawladda Suwisarland waxay bixi-saa joogitaan ku meel gaadh ah oo keliya.

Saldhigga Shuruucda

Sharciga ku meelgadhnimadu wuxuu ka soo arooraya Heeshiika Jeneefa ee ku saabsan xaaladda qaxootiga. Ogolaanshaha ku meel gaadhnimada waxaa lagu dejiyay Sharciga Fedaraalka ee arrimaha soo galleytiga ama ajnabiga (LEtr), iyo kuwa ku taxan. Nuqulka dhabta ah waxaad ka fiirsan karta internetka : www.admin.ch/ch/f/rs/c142_20.html

Buugyaraha Ajnabiga

Qaxootiga kumeelgaar ahaan loo oggolaaday waxay qaataan buugyaraha nooca F. Kan waxa lagu joogi karaa hal san oo kadib la cusboonaysiin karo kaddib markii ay ka fiirsadaan heyadaha ku shaqo leh meesha uu deggan yahay qofku. Shan sano kadib, laga soo bilaabo markii qofku soo galay Suwiser-land, wuxuu codsan karaa in la siiyo joogitaanka nooca B. Si codsigaa ay go'aan uga gaadhaan, waxay heyadaha ay khusaysaa fiiriyaan inuu qofku si fiican ula qabsaday dalka iyo xaaladda qoyska.
Waxa kale oo ay tixgeliyaan kana fiirsadaan in dalkiisii lagu celin karo iyo in kale.

Dadka la siiyo joogitaan ku meel gaadh ah — warqadda F

F

Waa kuwa codsigoodii la diiday hase yeeshee aan la celin karin oon laga eryi karin dalka Suwiserland, iyadoo aynay celintoodu **suurtagal ahayn** marka aynay Basaboor, ama celintoodu ka hor imanaysaa sharciga caalamiga, ama **macquulba ma aha** la celiyaa xanuun uu aad u xanu-unsanyo awgeed oo aanay caalami ahaan **sharci ahayn** ama caqligal ahayn.

Saldhigga Shuruucda

Sharciga daka ku jooga ku meel gaadhnimadu wuxuu ku qoto-maa Sharciga Federaalka ee soo galaytiga(LEtr), Qodobka 83 iyo kuwa ku taxan. Nuqulka dhabta ah ee LAtr waxaad ka fiirsan karta internetka : www.admin.ch/ch/f/rs/c142_20.html

Buugyaraha Ajnabiga

Dadka kumeelgaar ahaan loo oggolaaday waxay qaataan buugyaraha nooca F. Kan waxa lagu joogi karaa hal san oo kadib la cusboonaysiin karo kaddib markii ay ka fiirsadaan heyadaha ku shaqo leh meesha uu deggan yahay qofku. Shan sano kadib, laga soo bilaabo markii qofku soo galay Suwiserland, wuxuu codsan karaa in la siiyo joogitaanka nooca B. Si codsigaa ay go'aan uga gaadhaan, waxay heyadaha ay khusaysaa fiiriyaan inuu qofku si fiican ula qabsaday dalka iyo xaaladda qoyska.
Waxa kale oo ay tixgeliyaan kana fiirsadaan in dalkiisii lagu celin karo iyo in kale.

Qodobaynta macluumaad kooban iyo shuruucda

B Qaxootiga aqoonsiga — aqoonsiga B

F Qaxootiga ku meel gaadhka ah — warqadda F

F Dadka la siiyo joogitaan ku meel gaadh ah — warqadda F

Measha Deganaanshaha

B
F
F

Qaxootiga aqoonsiga leh iyo dadka iyo qaxootiga dalk ku jooga sis ku meel gaadh ah, waxay joogayaan gobolka ay laga siiyay deganaashaha ama qaxootinamada. Gobolka gudihiisa meesha ay rabaan bay kaga noolaan karaan. Adareeska ama cunwaanka guriga ayuun bay la socodsiinayaan heyadaha ay khusayso. Ogolaanshaha degaanshaha ee loo fidiyo dadka Ajnabiga ah waxa ay ka socdaan oo keliya gobolka laga bixiyey.

Macluumaad waxtar u leh kiraysteyaasha (ku qoran 15 luqo) : www.bwo.admin.ch/dokumentation/00106/00112/00121/index.html?lang=fr
Xidhiidhka kiraysteyaasha Suwiserland : www.asloca.ch

Ka Guuridda Gobolka

B

Xaaladda qaxootiga aqoonsiga leh waxa xukuma shuruucda guud ee khusaysa arrimaha ajnabiga. Hadday doonaan in ay u guuraan gobol kale waxay codsi u qoranayaan heyada ku shaqo leh arrimaaha guuritaanka meesha ay rabaan inay u guuraan. Codsiga waa la diidi haddii qofku uu shaqo la'aan ku sugan yahay ama ay jirto sabab kale oo loogu diidi karo codsigiisa lagagalana noqon karo sharciga joogitaankiisa.

F

Qaxootifa ku jooga si ku meel gaadh ah ee raba inay u guuraan gobol kale, waxay si toos ah codsi u qoranayaan Heyada Dawladda ee ku shaqo leh arrimaha socdaalka. Sidoo kale iyagana waa diidi karaan haddii qofku shaqo la'aan ku jiro ama ay jirto sabab loogala noqdo ogolaanshihiisa.

F

Dadka ku jooga si ku meel gaadh ahi, waxay codsan karaan inay gobol kale u guuraan iyagoo codsigooda toos u gudbinaya SEM. Codsadaha ayey labada gobolba dhegeysan doonaan inta aanay go'aan ka gaadhin. Codsiga si gaar ah ayaa loo aqbalaa haddii la mideynayo qoyska, iyo iyadoo ay jirto xaalad khatar ah oy ay la-bada gobolba ku qanacsan yihiin codsiga bedelaada.

Safarka Dibedda

B
F

Qaxootiga aqoonsiga leh iyo kuwa ku jooga si ku meel gaadh ahi waxay codsan karan dokomenti ay dibedda ugu doofi karaan kuna soo noqon karaan Suwistzerland. Si ay dokomentigaa u codsadaan waxay toos ugu tegeyaan cidda ku shaqo leh arrimaha socdaalka ee gobolka ay degan yihiin. Markaas ayaa SEM bixinayaan dokomentiga oo shan sano shaqaynaya.

Fiiro gaar ah : Tegitaanka dalkii laga soo qaxay wuxuu keeni karaa dib u qiimaynta heerka qaxootinimada.

F

Dadka ku jooga si ku meel gaadh ahi uma bixi karaan si caadi ah oo waa in ay baasaboorkooda dhigan SEM. Haddii ay jirto xaalad gaar ah (sida xanuun ama dhimasho ku timaada qof ka mid ah qoyska) waxay u tegeyaan xafiiska socdaalka ee goboka uu degan yahay kana codsadaa Visa uu ku soo noqon karo. Dadka aan helin karin baasaboor wadani ah, waxay codsan karaan baasaborka ajnabiga oo ay ku dhoofi karaan. Badanaa Visa du waxay ku eg tahay toban bilood, dokomentigan waan in loo isticmaalaa oo keliya sidii loogu talagalay.

Midaynt Qoyska

B Qaxootiga aqoonsiga lehi way keensan karaan xubnaha qoyskooda (labada isqaba, saaxiibka ama saxiibka ah ee diiwaan gashan, iyo caruurta da'doodu ka yartahay 18 sano) dalka Swiserland. Iyana waxa loo aqoonsanayaa qaxooti la aqoonsan yahay, mana jirin karaan waxyaabo kale oo ka hor iman kara ama u diidi kara.
Caruurta ay dhalaan qaxootiga aqoonsiga lihi ma heleyaan isla markaaba qaxootinimada. Marka ay dhashaan kadib, waa in waalidku sida ugu dhaqso badan uga codsadaan SEM ogolaashaha qaxootinimada ilmaha.

F Dadka iyo qaxootiga ku jooga sida ku meel gaadhka ahi, waa inay sugaan ugu yaraan saddex sano aqbalaadoodii kadib
F si ay uga codsadaan midayinta qoyskooda heyadaha gobolka ee arrimaha socdaalka. Waxaa Suwiserland iman kara oo keliya dadka is qaba iyo caruurtooda aan weli qaangaadhka ahayn (ee soolanaha ah). Midaynta qoyska waxa ku xidhan shuruudo dhawr ah : waa inay si fiican dalka ula qabsadeen, una dhexgaleen dadka, degan yihiin guri ku filan, isla markaana aanay ka sugin dawladda wax dhaqaala ah. Midaynta qoyska waxa la dalban karaa shan sano kadib. Haday caruurta ka yaryar yihiin laba iyo toban jir, mudada dalbashadu waxay u soo dhacaysa laba iyo toban bilood kadib.

Si fiican Ulaqbsiga Dalka iyo Dhaqankiisa (Integration)

B
F
F

Waa muhim in dadka muddo dheer Suwiserlalnd joogayaa ay durabadiiba si fiican ula qabsadaan habka nolasha iyo dadka Suwiserland. Sidaa darteed ayaa la filayaa dadka soo geleytiga ah in ay waxbartaan, afka gobolka ay degan yihiin ku dedaalaan in ay bartaan, sha-qo raadsadaan, bulshadana si fiican u dhex galaan. Dowladda Suwiisku waxay arrintaa ku dhiiri gelinaysaa barnaamijyo iyo mashaariic dadka oo dhan u furan loona wada siman yahay. Ulajeedaduna waxay tahay in dadka Suwiiska ah iyo soo galeytigu ay si wanaagsan u wada noolaadaan, iyagoo wadaagaya qiyamka Dastuurku ku dhisan yahay, lana wadaago is-xaqdhowr iyo dulqaad.

Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan siyaasada Suwiserland ee arrimaha isdhexgalka iyo dhaqan wadaaga : www.sem.admin.ch/bfm/fr/home/themen/integration.html

Dhiirigelinta Isdhexgalka (Integration)

B
F
F

Heyado badan oo kuwa duwali ah iyo kuwa gaar loo leeyahay isugu jira ayaa kaalmo u fidiya qaxootiga aqoonsga leh, iyo weliba dadka iyo qaxootiga dalka ku jooga si ku meel gaadh ah, si ay si fiican dadka u dhexgalaan. Taga meelaha aad ka heleysin tolooyin kana faai'daystaan fursadahaa. Waxaad talo iyo macluumaad ka heleysaan heyadaha arrimahan ku shaqo leh ee heer dowaldeed iyo heer gobol leh.

Macluumaad dheeraad oo la xidhiidha isdhexgalka : www.sem.admin.ch/bfm/fr/home/themen/integration/foerderung.html

Waxbarashada

B
F

Caruurta qaxootiga aqoonsiga leh iyo kuwa si ku meel gaadh ah ku jooga way tegi karaan, waana ina inay tagaan dugsiyada waxna bartaan. Waxba kagama duwana ardayda kale ee ku nool dalka Suwiiska.
Sida badan dugsiga xannaanada waxa ka dambeeya sagaal sano oo waxbarasho qasab ah. Kadib waxaa loo kala baxayaa, sida ay tacliinta ugu kala wanaagsan yihiin, kuwo u baydha dugsiyada farsamada iyo kuwo dugsiyada sare gala, halkaas oo ay kadib sii wataan tacliintooda

---

F

Caruurta daka si ku meel gaadh ah ku jooga qudhoodu waxay tagaan dugsyada xannaanada iyo kuwo sagaalka sano ee qasabka ah. Dhinac gelitaanka dugsiyada farsamada iyo dugsiyada sare iyo wixii ka dambeeya, goboladu way ku kala gedisan yihiin.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarasha iyo tababarada xirfadaha gaarka ah :
www.ch.ch/fr/ecole-obligatoire / www.formationprof.ch

Tabarada horumarinta shaqaalaha iyo xirfadle yaasha

B
F
F

Shaqaalaha waxa laga rabaa inay yeeshaan tayo heer sare ah dhinaca afka iyo dhinaca xirfadaba. Waxa dhacday inta badan in heerka aqoonta ee soo galelatigu uu ka hooseeyo heerka ay rabaan heyadaha loo shaqo doontaa, ama se dibloomayadooda ay dibeda kala yimaadeen ayaan laga aqoonsanayn Suiserland. Koorsyada afafka, iyo tayaynt shaqaalahu waxay ka mid yihiin fursado lagu fududaynayo isdhexgalka iyo si fiican ula qabsashada suuqa shaqada. Heyada ku shaqo leh isdhexgalka iyo dhaqan wadaaga (Integration) ayaad ka heli doontaan talo iyo macluumaad, iyo waliba heyadaha kale ee gobolka ee ku lug leh isla arrintaas.

Xidhiidhka adeegyada iyo hanuuninta gobolka :
www.kbsb.ch/dyn/20059.php

Shaqada

B
F
F

Qaxootiga aqoonsiga leh, iyo dadka iyo qaxootiga si ku meel gaadh ah ku joogaa, waxay u baahan yihiin u ogolaansho si ay u shaqaysan karaan. Heyadaha shaqo bixinta ayaa had iyo jeer baahidooda u gudbiya heyadaha gobolada ee arrimaha soo galeytiga ku lug leh. Shaqo ma bilaabi kartid ilaa aad hesho ogolaanshahaa. Intaan shaqadaa la bixin, waxay heyaduhu hubiyaan inay xaaladda shaqada iyo musharku wanaagsan yihiin. Tani waxay ilalinaysaa xuquuqdaada shaqaalanimo, kaa joojinaysaana in lagugu shaqaalaysiiyo mushahar ka hooseeya dadka kale.

B
F

Qaxootiga la aqoonsan yahay iyo qaxootiga si ku meel gaadh ah ku joogaa waa in ay si dhaba shaqo u raadsadaan. Xor bay u yihiin inay suuqa shaqada ee gobolkooda iyo degaankooda shaqo ka raadsadaan, iyadoo ay u wada furan yihiin qaybaha shaqada ee kala gedisan.

F

Heydaha gobolada ayaa siiya daka ku jooga si ku meel gaadh ah, ogolaansho shaqo oo qofku si fiican ugu noolaan karo, isagoo ka madax banaan xaaladda suuqa shaqada iyo ta dhaqaalaha.

Macluumaad faahfaahsan kuna saabsan shaqo raadinta :
www.espace-emploi.ch
Macluumaadka shaqo raadinta :
www.ch.ch/fr/droit-du-travail

Caafimaadka

B
F
F

Dalka Suwiiska arrimaha caafimaadku aad bay u tayo wanaagsan yihiin. Ogow fursadaha jira ee caafimaad ee kaa caawin kara dhinaca caafimaadka si aad adiga iyo qoyskaagu ugu noolaataan caafimad wanaagsan.

Barashada afka gobolka aad joogtaa waa waa muhim si aad u hesho macluumaadka ku saabsan arrimaha caafimaadka iyo la xidhiidhka shaqaalaha caafimaadka.

Xafiiska Federaaka ee Caafimaadka Guud wuxuu siiyaa soo galeytiga macluumaad badan, oo ku qoran afaf badan kuna saabsan iska ilaalinta iyo dawenta cudurada dhinaca jidhka iyo maskaxdaba :
ww.migesplus.ch/fr

Magaalooyinka Genève, Lausanne, Bern, iyo Zurich, Laanqayrta cas ayaa bixisa kaalmo caa-fimaad oo dhinac muruq iyo maskeeedba leh ; talo iyo taakulana u fidisa dadka jid-dil lagu soo sameeyey iyo kuwa ku soo tabaaloobay dagaalada iyo xigtadooda :
www.redcross.ch/fr/organisation/service-ambulatoire-pour-victimes-de-la-torture-et-de-la-guerre/aide-pour-les-personnes

Xarunta GRAVITA, ee cudurada dhimir iyo naxdint ayaa iyana siisa kaalmo dadka la soo jidh-dilay iyo kuwa ku soo tabaaloobay dagaalada iyo xigtadooda :
www.gravita.ch/angebot

Caymiska Bulshada

B
F
F

Dalka Suwiisku waxay leeyihiin caymis bulsho oo tiro iyo tayo fiicanba leh. Qaxootiga aqoonsiga leh, iyo dadka iyo qaxootiga ku jooga dalka si ku meel gaadh ah ; waxay haystaan caymiska wadaniyiintu haystaan oo kale, sida ka shaqola'aanta iyo naafada. Caymiskan bulshadu waxa kale oo ay siiyaan dadka da'da weyn ee shaqada ka fadhiistay gunno joogta ah. Sidoo kale dumarka shaqeeya waxa la siiyaa fasaxa umusha iyagoo qaadanaya lacagtoodii. Waxaa iyana gunnooyin la siiyaa marka labadii is qabay midkood dhinto, ama caruurta yaryar waalid kood dhinto.
Caymiska Bulshada waxa lacagt uga timaada qaadhaanka iyo dhigaalka joogtada ah : marka aad shaqaynayso lacag xadidan ayaa mushaharkaaga laga jarayaa. Intaa weliba waxa dheer, shaqaalaha oo laga caymiyo shilka iyo cudurada laga qaado shaqada iyo jawigeeda, taasoo ay bixiyaan kuwa loo shaqeeyaa.

Faahfaahin dheeraad ah ee caymiska bulshada :
www.bsv.admin.ch/themen/index.html?lang=fr
Tallaabooyinka aad qaadayso markaad shaqo La'dahay :
www.espace-emploi.ch/arbeitslos/erste_schritte
Caymisyo kale : www.ch.ch/fr/assurances

Cashuuraha iyo Cashuurta Gaarka ah

B
F
F

Qaxootiga aqoonsiga leh, iyo daka iyo qaxootiga dalka ku jooga sida ku meel gaadh ahi, waa in ay bixiyaan cashuuraha ; kuwaas oo si joogta looga jaro musharkooda (Qodobka83 ilaa 116 ee Sharciga Cashuuraha Federaalka ee tooska ah). Qadarka cashuuraha la jarayaa way isbeddelaan min gobol ilaa gobol.

F

Dadka sida ku meel gaadhka ku jooga ee haysta shaqooyin wanaagsani waa in ay bixiyaan cashuur dheeraad ah oo ku qiyaasan 10% mushaharkiisa inta aan waxba laga jarjarin. Loo shaqeeyaha ayaa cashuurtan toos mushaharka uga jar una soo dira SEM.

Ka jarida cashuurta gaarka ah waxay bilaabantaa saddex sano kadib ogolaansha degitaanka ee ku meel gaadhka ah, ama tododa sano iyo in ka badan kadib soo gelitaanka dalka, ama marka la gaadho lacag dhan 15, 000 oo Fran.

SEM waxay daabacday qoraal ku saabsan cashuurta gaarka ah : www.sem.admin.ch/bfm/fr/home/asyl/sonderabgabe.html

Kalmo Bulsho

B
F

Qaxootiga aqoonsiga leh iyo qaxooitiga si ku meel gaadh waxay xaq u leeyahay kaalmada bulsho ee la siiyo wadaniyiinta Suwiiska oo kae hadii aanay isku filayn iyagu.

F

Kaalmada bulsho ee la siinayo dadka dalka ku jooga si ku meel gaadh ah waxa xukuma sharciga gobolka. Waxana ka hadlaya Qodobada 80 ila 84 LAsi ee khuseeya kaalmada bulsho ee la siiyo dadka so codsaday qaxootinimada ee soo weydiista kaalmada (iyadoo la raacayo Qodobka 86 ee LEr). Gobolada qarkood kaalmada ay siiyaan dadka dalka ku jooga si meel gaadh ahi way ka yartahay kuwa la siiyo qaxootiga aqoonsiga leh iyo dadka si ku meel gaadh ah dalka ku jooga.

B
F
F

Kaalmada bulshada waxa laga bixiyaa dakhliga cashuuraha. Qadarka lacageed ee loo qoondayey way isbeddeleysaa min gobol ilaa gobol. Marka la xisaabinayo qadarka lacagta kaalmada bulshada, waxa badanaa la raacaa heerka lagu qeexay Shirweynaha Suwiiska ee heyadaha dhaqdhaqaaqa kaalmada bulshada (CSIAS). Heerkaasi wuxuu dammaanad qaadayaa sinnaanta iyo si fiican u hirgelinta qaabka kaalmada bulshada ee Suwiika.

Macluumaad dheeraad ah ka fiirso : http://csias.ch/aide-sociale-et-pratique/questions-frequentes

Waa in qofkasta oo karaya iska xoreeyaa ku tiirsanaanta iyo isku halaynta kaalmada bulshada kuna fillaada baahida naftiisa iyo qoyskiisa.

Cinwaanno Muhim ah

Heyadaha gobolada ee ku shaqo leh arrinaha socdaalka :
www.sem.admin.ch/bfm/fr/home/ueberuns/kontakt/kantonale_behoerden/adressen_kantone_und.html

Heyadaha gobolada ee ku shaqo leh arrimaha qaadashada wadaninimada :
www.sem.admn.ch/bfm/fr/home/ueberuns/kontakt/kantonale_behoerden/kantonale_einbuergerungsbehoerden.html

Heyadaha gobolada ee ku shaqo leh habraaca faafinta iyo iidehda :
www.sem.admin.ch/bfm/fr/home/ueberuns/kontakt/kantonale_behoerden/Adressen_Meldeverfahren.html

Adeegyada u xilsaaran isdhexgalka ee gobolada iyo magaalooyinka :
www.sem.admin.ch/bfm/fr/home/ueberuns/kontakt/kantonale_behoerden/kantonale_ansprechstellen.html

Xidhiidhyo kale oo waxtar leh

Laynka heyadaha Suwiiska :
www.ch.ch

Heyada Dawlada ee socdaalka (SEM) :
www.sem.admin.ch

Guddiga Federaalka ee socdaalka (CFM) :
www.ekm.admin.ch

Daabacaad

Tifatir	Staatssekretariat für Migration SEM Quellenweg 6, CH–3003 Bern Wabern
Tifatir	Information und Kommunikation, SEM
Garaafayn	meierkolb, Luzern
Sawiraadda	Fabian Biasio, Luzern
Baahinta	BBL, Vertrieb Bundespublikationen CH–3003 Bern www.bundespublikationen.admin.ch

Eddishankii 1aad 2015

Böhler Thyssen



Broshuur kani waxa kale oo lagu helayaa qaabka eloktrooniga ee www.sem.admin.ch isagoo ku qoran afafka : Jarmalka, Fransiiska, Talyaniga, Ingriiska, Carabiga, Tigreega, Kurdiga, Tibeetka, Faarisiga, Taamilka, Soomaaliga, Bosniyaanka, Korowshianka, iyo Serbianka

www.sem.admin.ch